**Saddexda jaad oo noolaha ahi waxay leeyihiin koofiyado dhibco leh. Laakiin dhibcuhu si yar oo fudud ayey uga daataan, iyagoo waxoogaa yar ay ku hadhayaan ama aanay waxba ku hadhayn.**



## Röd flugsvamp

*Amanita muscaria*

Koofiyad 10-25 santimitir. Midabka koofiyadu wuu kala duwan yahay casaan iftiimaya ilaa midabka casaan liimi xiga. Dhibdhibcuhu waa cadaan. Jiridu waxay leedahay wareeg balaadhan qaybta hoose ee jiridu way bararsan tahay. Waxay ka dhexbaxaan geed caleemihisiisu ay dhacaan xilliga dayrta iyo dhir jiqa oo ka baxa dhilka alwaaxda.



## Brun flugsvamp

*Amanita regalis*

Koofiyada buniga huruudiga xigta wuxuu leeg yahay 10-ilaa 20 santimitir waxaanay leedahay dhibdhibco cadaan huruudi xiga. Jiridu waxay leedahay wareeg gaara qaybta hoose ee jiridu waxay leedahay barar. Waxay ka dhex baxdaa dhir jiqa oo ka baxa dhulka alwaaxda.



## Panterflugsvamp

*Amanita pantherina*

koofiyadiisu wuxuu leeg yahay 5 ilaa12 santimitir waxaanay leedahay cawlaan. Dhibcuhu waa cadaan oo had iyo jeer waxay wareeg ku leeyihiin xagga sare ee jirida. Qaybta hoose ee jiridu waxay leedahay barar. Waxay ka dhex baxaan geed caleemihisiisu ay dhacaan xilliga dayrta iyo dhir jiqa oo ka baxa dhulka alwaaxda iyo beeraha nasashada, mararka qarkood sidoo kale waxay ka dhex baxaa kaymaha dhir jiq ah.

## Waxyeelada iyo astaamaha ay suntu leedahay

Dhammaan likayaashani waxay ka kooban yihiin sun taas oo hakad galisa habdhiska dareen wadka. Dawakhaad, jahwareer, werwer, heerka dareenka oggaanshiyaha oo ay yarayso waxaana dhici karta cidhiidhi galin inay dhacdo. Mararka qaarkood sidoo kale waxaad dareemi kartaa xanuun iyo matag.

**Sidee ayaad u oggaan kartaa macluumaadka badan ee ku saabsan likayaasha?**

- Iska tasjiili casharada lagu barto likayaasha ama safarada gaagaaban. Ururada waxbarashada iyo ururada likha ayaa diyaariyaa casharda iyo safarada gaagaaban.
- Shabakadaha faa'idada leh: www.svampkonsulent.se  
  www.svampguiden.com

Sawirada iyo khariirada: Michael Krikorev

Warqdan yare e macluumaadka xanbaarsan waxaa soo uruurshay Xarunta Macluumaadka Sunta ee Iswidhan iyagoo la kaashanaya Ururka La taliyayaasha Likaha Iswidhin

Svamp konsulenternas Riksförbund

# Ka ugu sunta badan Likayaasha ka baxa guddaha Sweden!



**JOOJI!**

- Ha goosanin likaha u eeg shay kasta kuwa ku dhex yaala warqadan macluumaadka xambaarsan!
- Waxaad kaliya ood qaadataa likaha aad aqoonsato!
- Ha dhadhaminin iyaga! Xaataa likayaasha suntan lihi waxay leeyihiin dhadhan!
- Ha nadiifiyaan likaha dadka waawayn ee aqoonta u leh!
- Soo qaado buuggaaga casriga ah ee ka hadlaya likaha!

**Wac telefoon lambarka 112 (adeegga 24- saacood) haddiiba ay dhacdo xaalada degdeg ah oo suntan leh waydii macluumaadka ku saabsan Sunta. Wac telefoon lambarka 010-456 6700 haddiiba ay timaado xaalado aan sidaa u dedeg badnayn. www.gic.se**



## Vit flugsvamp

*Amanita virosa*

Dhammaantii likuhu waa cadaan. Koofiyad 5 ilaa 12 santimitir. Jiridu had iyo jeer waxay leedahay wareg, laakiin mararka qaarkood ma laha Marka run ahaantii ay yar yihiin waxay u eeg yihiin beedka. Qaybta hoose ee jirida, taas oo badaniyaa ku fadhida dhirta ajada ku baxda oo qoto dheer, bararsan. Vit flugsvamp waxay ka dhex baxaan kaymo geedo ajaa oo caleemo dhaadheer iyo kaymo leh geedo jiridoodu isku siman tahay.

### Waxyeelada iyo astaamaha ay suntu leedahay

Suntu waxay waxyeelaysaa beerka. Calaamadaha waxaa ka mida shuban biyood, xanuun dareemid iyo matag bilaabanta saacado badan kadib marka la cuno ama cabo likaha. Wuxuu beerka u gaysan karaa waxyeelo halisa. Suntu waxay noqon kartaa mid dhimasho keenta.



## Lömsk flugsvamp

*Amanita phalloides*

koofiyada 5 ilaa-12 santimitir. Midabka koofiyadu aad ayey isku badbadali kartaa, guud ahaan dhammaanteed waxay isku badalaysaa cadaan ilaa doogo ama cawlaan iyo buni muuqaalkiisu waxoogaa uu muuqdo. Waafyadu waa cadaan. Jiridu waxay leedahay wareeg khafiifa, laakiin had iyo jeer khafiif maaha. Qaybta hoose ee jiridu way bararsan tahay. lömsk flugsvamp wuxuu ka dhex baxaan kaymo geeddo cal-eemihisiisu ay dhacaan xilliga dayrta, kaymo isku jira (geed caleemihisiisu ay dhacaan xilliga dayrta iyo dhirta jiqda ah si wada jira ayey u baxaan) waxay ka dhexbaxaan seerayaal leh geedo jiridoodu ay isku siman tahay, geedaha ay alwaaxdu ka baxdo iyo geed uu ka baxo midho yicibta u eeg.

### Waxyeelada ay leedahay suntan Iyo calaamadaha

Waxay ka kooban tahay sun isku mida sida ka vit flugsvamp. Calaamado isku mida oo dhimasho leh – eeg xagga sare!



## Toppig giftspindling

*Cortinarius rubellus (C. speciosissimus)*

Koofiyad 4-8 santimitir. Dhammaantii likuhu wuxuu leeyahay midab buni ah oo xiga buni hu-ruudi ah. Koofiyadu had iyo jeer waxay leedahay muuqaalka sida toobinta oo kale, laakiin had iyo jeer muuqaalkaas ma yeelato. Waxay ka dhex baxaan kaymo geedo ajaa oo caleemo dhaadheer iyo kaymo leh geedo jiridoodu isku siman tahay. Fool's webcap *(C. orellanus)* waa jaad noole ah oo siku mida kana kooba sun isku mida. *Geedo jiridoodu ay isku siman tahay, geedaha ay alwaaxdu ka baxdo, iyo geed uu ka baxo midho yicibta u eeg.*

### Waxyeelada iyo astaamaha sunta

Suntu waxay waxyeelaysaa kalyaha oo ay gebi ahaanteedba ay burburisaa. Astaamaha suntu ma dhacdo ilaa toddoba casho kadib ilaa la cuno ama cabo likaha. Calaamadaha waxaa ka mida oon, muruq xanuun, xadiga kaadida oo badata ama yaraata. Sumawgu wuxuu horseedi karaa dib u dhac ku yimaado daawaynta qalabka kalida lagu isticmaalayo oo xaaladaha qaarkood xaataa ay iman karto in kalida laga saaro.



## Stenmurkla

*Gyromitra esculenta*

Stenmurkla wuxuu gebi ahaantiisba uu ka duwan yahay bahda likaha. Koofiyadu waxaa leeg tahay 4 ilaa 12 santimitir, muuqaaleeka buni qaabka ay maskaxdu samaysan tahay. Jiridu waxay ku kala duwan yihiin midabka oo xiga cawlaan khafiifa, waxaoogaa midabka buniga ah ama ubax liidliid leh. Stenmurkla wuxuu baxaa dayrta bisha April ilamaa geedku uu la caleemaysanayo, had iyo jeer wuxuu ka baxaa cidhifyada wadooyinka dhulka alwaaxdo ka baxdo iyo wadooyinka, jirid ay xiddidadu soo rujisan yihiin ama meelo nadiifsan.

### Waxyeelada suntan Iyo calaamadaha

Suntu waxay hakad galisaa habdhiska dareen wadka sidoo kalena waxay wax yeelaysaa unuggyada dhiiga iyo beerka. Calaamadaha waxaa ka mida dawakhaad, araga oo baahan ama hadal gabgablayn. Dareen xanuun leh iyo calool xanuun ayaa sidoo kale suurtogal ah in ay noqdaan calaamadaha.